# Ka hortagga iyo iska leexinta

Macluumaad loogu talaggalay dadka deggan Bristol oo ku saabsan xagjirnimada, xagjireynta



KEEPING BRISTOL SAFE PARTNERSHIP

BRISTOL CITY COUNCIL

# Tusmada


Yaa macluumaadkan loogu talaggalay ? 3

Waa maxay argaggixiso iyo xagjirnimo? 3

Waa maxay xagjirayn ? 4

Waa maxay ka hortaggu ? 5

Ogow hubi oo la wadaag 6

Xaaladda degdegga ah 7

Halkee ka heli koraa xog dheeraad ah ? 8






# Yaa macluumaadkan loogu talaggalay?

Macluumaadkan waxaa loogu talaggalay dhammaan dadka deggan Bristol iyo sidoo kale dadka soo booqda magaaladeenna. Ujeeddadu waa in la bixiyo sharraxaad ku saabsan xagjirnimada, xagjiraynta iyo argaggiisadaiyo barnaamijka Ka Hortagga (Prevent), si aad u dareento inaad wax ka og tahay oo aad awood u leedahay inaad qaaddo tallaabooyin si aad taageero u hesho haddii aad ka welwelsan tahay qof.

# Waa maxay argaggixiso iyo xagjirnimo?

Qeexista **xagjirnimo** waxaa la beddelay 2024kii, si loo xoojiyo awooddeena aannu wax kaga qabanno halistan, iyadoo loo hoggaansamayo waajibka kowaad ee dawladda - in lilaaliyo muwaadiniinteena oo amniga dalkeenna la sugo.

**Xagjirnimo** waa dhiirrigelinta ama samaynta fikrad ku salaysan gacan ka hadal, nacayb ama dulqaad la'aan, taas oo ujeedadeedu tahay:

In **laga hor yimaado** ama la **baabbi'iyo** xuquuqda iyo xorriyadda aasaasiga ah ee dadka kale, ama,

In la **wiiqo**, la **tuuro** ama la **beddelo** habka dimuqraadiyadda baarlamaanka ku salaynsan xorta ah ee Biritayn iyo xuquuqda dimuqraadiyadda; ama,

In **si ula kac ah** loo abuuro jawi u fududeynaya dad kale inay gaaraan natiijooyinka (1aad) ama (2aad).

## Waa maxay xagjireyntu?

**Xagjirayn waxaa lagu tilmaami karaa habka uu qofku ku difaaco, ku taageero ama kaga qaybqaato xagjirnimo gacan ka hadal leh ama xitaa dambiyada hoos yimaada sharciga argaggixisada ee Biritayn.**

Ma jirto waddo keliya oo xagjirayn ah, waa hannaan u gaar ah qof kasta; xagjiraytu waa safar, maaha daqiiqad keliya oo waqti ka mid ah. Waa taxane saamayn iyo dhacdooyin nololeed oo sababa rumaysashada aydiyoolajiyad xagjir ah oo la xiriirta kooxaha argaggixisada. Muddayda lagu xagjireeyo qof waxay qaadataa waqti aan la cayimi karin; tani waxay noqon kartaa maalmo, toddobaadyo, bilo ama xitaa sannado.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in qofka xagjireeyay laga yaabo inuusan waligiis la kulmin saamaynta xagjiraynta shakhsi ahaan. Shakhsiyaadka waxaa la xagjirayn karaa iyagoo la xiriira kooxaha ama shaqsiyaadka xagjirka ah, inta badan iyagoo adeegsanaya internalka. Dhallinyaradu waxay u badan yihiin inay halis badan ugu jiraan in la xagjireeyo sababtoo ah aad ayay u madax-bannaan yihiin oo waxy bay ogaadaan ama xadgudubyo sameeyaan inta ay korayaan oo oganaayaan haybtooda iyo bulshada ay ka tirsan yihiin.

Kooxaha xagjirka ah ayaa inta badan beegsada dhallinyarada iyagoo adeegsanaya internetka iyo baraha bulshada. Halista ay leeyihiin xagjirka ku sugan internetka ayaa ah mid u weyn oo waa sababta uu madaxa Booliska Ka Hortagga Argaggisa xisada ee Biritayn UK uu yiri:"

*"Ka sokow dhammaan faa'iidooyinkiisa, internetku wuxuu sidoo kale caalami ka dhigay xagjirnimada, wuxuu kordhiya faafitaaka fikradaha nacaybka ku salaysan ee caalamiga ah, wuxuuna suurtaggaliyay in qof kasta oo isticmaala internet uu soo la xiriiro carruurta ku sugan meelo fogfog adduunka."*





## Waa maxay Ka hortaggu?

**Ujeeddada asaasiga ah ee Ka Hortaggu waa ka joojinta dadka inay noqdaan argaggixiso ama ay taageeraan argaggixisada.**

Ka Hortaggu waa qayb ka mid ah barnaamijka CONTEST, istaraatiijiyadda ka hortagga argagixisada ee Dawladda. Taageerada faragelinta hore oo uu bixiyo Ka Hortaggu waxay wax ka qabtaa arrimaha ku saabsan, qof, fikrad iyo bulsho ee ka dhigaya dadka kuwo xagjirraynta u nugul.

**Barnaamijka Ka Hortagga heer qaran:**

5

Wuxuu la shaqeeyaa la- hawlgalayaasha safka hore sida barayaasha, xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha bulshada, booliiska, hay'adaha samafalka iyo bulshada rayidka ah, cilmi-nafsiga, hoggaamiyeyaasha bulshada iyo kuwo kale;

Waxaa bixiya kooxaha maamulka deegaanka, kooxaha booliiska deegaanka, ururrada bulshada iyo hay'adaha samafalkau u leh khibradda ugu wanaagsan aaggooda;

Looguma talaggalin bulsho gaar ah oo wuxuu wax ka qabtaa dhammaan noocyada arggagixisada, oo ay ka mid yihiin kuwa caalamiga ah ama ka soo horjeeda reer Galbeedka, garabka midig oo xagjirka ah iyo halis kala duduwan oo soo baxaya;

Kuma koobna koox da' gaar ah jirta;

Ma aha qalab wax lagu basaaso ama kor wax lagala socdo, waajibaadka Ka Hortaggu ma yaraynayo xorriyadda hadalka. Waa qayb ka mid ah waajibaadka ballaaran ee ilaalinta oo aan ugu talaggalnay in dadka laga ilaaliyo waxyeello.

Dulucda Ka Hortaggu waa ilaalinta carruurta iyo dadka waaweyn iyo bixinta faragelin hore si loo ilaaliyo loogana leexiyo dadka inay kaalin ku yeeshaan dhaqdhaqaaqyada arggagixisada.

Waxaannu nahay magaalo ay ku nool yihiin bulshooyin badan, oo waa muhiim inaannu aad uga shaqayno sidii aannu u fahmi lahayn walaaca bulshada, cabashooyinka iyo waxyaabaha horseedi kara in dadku ay ku lug yeeshaan dhaqdhaqaaqyada xagjirnimada. Waxaannu doonaynaa inaannu xoojinno xiriirkeenna bulshooyinka si aannu ugu shaqeyno si wadajir ah una bixinno hawlo lagu taageerayo dadka laga yaabo xagjiraynta iyo xagjirnimada u nugul yihiin.

# Ogow – Hubi – La Wadaag

Haddii aad taqaanind qof aad uga shakisan inuu xagjiraynta u nugul yahay, waxaa jira hannaan badbaado oo 3-tallaabo ah oo lagu qiimeeyo laguna maareeyo welwellada— waxaa loo yaqaan 'Ogow – Hubi – Wadaag'

**1. OGOW** isbeddelka dhaqanka, isticmaalka afka ama welwellada kale la xiriira Ka hortagga.

**2. HUBI** Welwelkaaga qofka (haddii ay badqab tahay inaad sidaas sameyso) ama haddii ay ku habboon tahay, qof mas'uul ah oo qofkaas yaqaanna, si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Haddii aad shaqaynayso, waxaa sidoo kale habboon inaad la hadasho maamulahaaga.

**3. LA WADAAG** wewelkaaga, adiga oo:

Raacaya nidaamka wax u gudbinta Ka-hortagga ee hay'addaada, haddii aad shaqaynayso

**ama**

Booqo websaydka Act oo ah **www.actearly.uk** ama wac telefoonkan

**0800 011 3764** si aad u hesho talobixin gaar ah.






## Haddii ay jirto xaalad degdeg ah, hubi inaad badqab tahay oo wac 999

Si aad u soo sheegto macluumaad sharci-darro ah ama waxyeello leh, sawirro ama muuqaallo aad ka heshay internetka, aad **www.gov.uk/report-terrorism**

Xusuuso, haddii aad qof u soo gudbiso Ka-hortagga ma keeni doono dhibaato haddii uusan qofku dembi galin. Ka-hortagga ma isku dayo inuu ciqaabo dadka oo qofku ma yeelan doono tixraac dambi isagoo ka qeybqaadanaya barnaamijka. Ka-hortagga wuxuu dadka la xiriirsiiyaa taageerada ay u baahan yihiin si ay naftooda iyo kuwa kale uga ilaaliyaan halista xagjiraynta.

# Halkee ka heli karaa xog dheeraad ah?

- Booqo bogga Bristol Council **www.bristol.gov.uk** oo ku qor 'Prevent' barta baaritaanka
- Booqo **actearly.uk**
- Booqo **www.gov.uk/prevent** si aad u hesho hagis ku saabsan barnaamijka Prevent
- Waxaad internetka ka akhrin kartaa warbixinta ku saabsan halista xagjirnimada adiga oo ku qoraya ' five eyes report into online extremism' barta baaritaanka ee kumbuyiitarkaaga



Warqaddan waxaa soo saaray Golaha Magaalada Bristol ee magaca Kooxda Ka Hortagga, si loogu faa'iidaysto dadka deggan iyo booqdayaasha magaalada Bristol.